
HAGAHA
ARDAYGA
Sanadka 1-aad ee Jaamacadda
Qore:
Mohamed Ali Yalahow

## Cinwaanada Buugga

1. **Horudhac**
2. **Ka Hor Jaamacadda**
3. **Isbuuca 1-aad ee Jaamacadda**
4. **Sida loo Qaato Notes-ka Cashirka**
5. **Sida Ugu Fiican ee loo Akhriyo Buugta Cashirada**
6. **Sida loo Diyaariyo Assignments-ka**
7. **Sida loo Diyaariyo Presentations-ka loona soo Jeediyo**
8. **Guusha Maalinta Imtixaanka**
9. **Imtixaanada Kadib**
10. **Dhaqanka Maalinta Natiijada**
11. **Gunaanad**

## Horudhac

Mahad idilkeed waxay u sugnaatay allahii na abuuray, naga mid dhigay adoomihiisa muslimka ah, wax akhriya waxna qora, intey nool yihiina tacliinta aanan ka tagin.

Waxaan sidoo kale u mahad celinayaa dhammaan aqoonyahankii, ardaydii, waalidkii, iyo asxabtii igu dhiiri geliyay, garab hiil iyo hoona ila garab taagnaa intii aan waday qoridda buugan aan ugu magac daray HAGAHA ARDAYGA SANADKA 1-aad EE JAAMACADDA.

Buugan oo ah buuggii ugu horeeyay ee noociisa ah ee afka soomaaliga ah lagu qoro ayaa waxaa igu dhaliyay arimo ay ka mid yihiin:

- Baahida ardayga sanadka 1-aad ee jaamacadda uu uqabo garab iyo latalin daacad ah.
- Cabsida iyo walwalka ardayga uu ku nool yahay sanadka 1-aad ee jaamacadda oo badankeed ah wax uu ka gudbi karo.
- Dhaqan jaamacadeedka iyo qaabka waxbaridda oo ah mid ku cusub kuna adag ardayga sanadka 1-aad ee jaamacadda.
- Baahi dheeraad ah oo aan u qabo caawinta ardayda walaalahey ah, iyo in aan u iftiimiyo culeyskii aan soo maray aniga xilligeygii sanadka 1-aad ee jaamacadda.

Hadaba waxaan ugu baaqayaa dhamaan ardayda walaalahay ah in ay ka faa'iideystaan buuggan, gaarsiiyaana cid walba uu u noqon karo caawimaad waxna ka faa'iidi karta.

Ugu dambeyna waxaan ka afeefanayaa in aan la ii qaban qaladaadka iga dhici kara dhan daabacaad, qoraal, iyo nuxur ka hadalka oo soo koobneen intaba oo aan sabab uga dhigayo, cuseebka aan ku cusbahay wax ku qoridda afka soomaaliga.

## Ka Hor Jaamacadda

Markii aad soo dhamaysato Dugsigaaga sare, ka hor intaadan dooran jaamacad waa in aad Qaadataa go'aan aad iyo aad muhim ugu ah noloshaada – waana in aad doorataa xirfadda ama shaqadaada mustaqbalka, hadaba markii aad ogaatid waxa ay tahay xirfaddaadu ayaad waxaad ku dhaqaaqaysaa go'aamadan soo socda .

- Doorashada Takhasuska aad Baran lahayd iyo
- Jaamacaddii aad ka baran lahayd.

Ma fududa Go'aamadaas, maxaa yeelay waxay saamayn ku yeelanayaan Mustaqbaaalkaga dambe.

Hadaba cutubkan **Kahor Jaamacadda** ayaan uga hadli donnaa si faahfaahsan arimaha xiriirka la leh go'aanadaas aan kor ku soo sheegnay, iyo waxa kuu fududeen kara in aad sida ugu saxan ugu dhaqaaqdid.

Waxaase naga dardaaran ah in aad sida saxda ah u fikirtaa oo aad maskaxdaada soo xaadirisaa inta aad akhrinayso cutubkaan, si aad u dhadhamisid xaqiiqada iyo xikmadaha uu xambaarsan yahay.

1. Ma Go'aansan wali waxa aan noqon doono!

Ugu horreyn ha walwalin hana walaacin, Dhammaan aqoonyahanada caanka ah iyo dadka jaamacadaha dhamaystay waxa ay aadeen jaamacadaha ayaga oo sidada oo kale an garanayn wax ay ku dhaqaaqaan ama bartaan, taana waa caadi ee haka walwalin hana walaacin.

Ma is weydiinaysaa oo maka fikireysaa su'aalahan markii aad istiraahdo go'aan kaaga jaamacadeed qaado:

Maxaan Bartaa?

Tollow Maxaan Ku Fiicanahay?

Maadooyinkeen ku fiicneen oo aan rabaa in aan ka fogaado?

Jaamacadeen Galaa?

Ma Dalkaan wax ku bartaa mise Dibaddan aadaa?

2. Qaado Go'aanka Ugu Wacan Una Qalma Mustaqbalkaaga!

Arday badani waxa ay ku doortaan takhasuskooda jaamacadeed kaliya In uu doortay saaxiibkii maadadaas ama uu waalidkiis ku yiri waxaan jeclahay in aad baratid maado hebel oo aysan labaduba ahayn kuwii aad uqalantay ama aad jeclayd, taasi waxay adiga iyo jaamacadda aad gashayba ku tahay waqti dhumis.
Dooro kaliya maadada aad jeceshahay iyo jaamacadda ugu horeysa jaamacadaha laga dhigto maadada aad jeceshahay ee aad dooratay. Tani maahan nafta saaxiibkaa iyo tan waalidkaa toona ee waa naftaada iyo mustaqblkaaga, waxaana xaqiiqa ah in waalidkaa iyo saaxiibadaaba ay ka xumman doonaan marki aad sanadka ugu horeeyaba aad jaamacadda kudhacdo ama aad ka baxdo in ay kugu adkaatay oo aad ka heli waysay maadada aad ka bilowday daraadeed.

3. Dooro Jaamacadda Ugu Haboon Takhasuskaaga!

Si aad u doorato jaamacadda mustaqbalkaaga, waxaad samaysaa qiimayn guud adiga oo kaashanaya dad kaa aqoon badan ama kaa garaad roon sida waalidiintaa ama macalimiintaadii dugsiga sare, waxaa ka mid ah meelaha aad ka fiirinaysid jaamacadaha:-

1. Darajada jaamacadda ay ku dhex leedahay bulshada dhexdeeda, iyo waxa ay ka aminsanyihiin bulshada jaamacaddaas.
2. Qanacsanaanta ardayda dhigata jaamacaddaas iyo tayadooda aqooneed iyo midda akhlaaqeed intaba.
3. Tayada iyo horumarka manhajka jaamacadda iyo ilaha ay ka helaan buugaagta manhajkooda.
4. Xiriiradu jaamacadda la leedahay jaamacadaha kale ee dalka iyo kuwa dibadda intaba.
5. Iyo in takhasuskii aad doorатay laga helo kuna ammaanan tahay horumarka ay ka gaartay qaybtaas.

6. Iyo wax walbo oo wanaag iyo horumar jaamacadeed ah ee ay kugula taliyaan dadka kaa garaad roon ee aad ka qaadanaysid talada.

4. Ha Noqon Fuley ama Damiin Ku Hara Sanadka 1-aad ee jaamacadda!

Waxaa ku soo wajahaya ama wajihi doona arday badan oo ka mid ah ardayda jaamacadaha bilaaba sanadka ugu horeeya culays ka weyn waxa ay xamili karaan oo ku sababa in ay ardayda qaar fuleynimo uga cararaan jaamacaddii ama ay qaar kale damiinnimo ay sababtay walwalka iyo culayska soo wajahay ay ku dhacaan sanadka 1-aad imtixaanka jaamacadda, mana ahan waxa laga filayo in uu ku sifoobo ardayga caaqilka ah geesigana ah ee go’aansaday in uu mustaqbalkiisa dhisto horumarna ka gaaro waxbarashadiisa, waxaa ka mid ah culayska soo wajihi doona ardayda sanadka 1-aad ee jaamacadda:-

1. Jawi ama cimilo ka duwan tii uu mudada badan wax ku soo baranayay.
2. Bulsho ka duwan tii ay isfahamsanaayeen muddo badanna ay wax soo wadaageen.
3. Cashiro ka adag kana badan kuwii logu soo dhigi jiray dugsiga sare illaa kii hoose.
4. Nidaam imtixaaneed ka duwan kuwii uu horey usoo gali jiray.
5. Buug iyo manhaj ka badan kana waawayn kuwii uu horey uso dhigtay.
6. Layli iyo shaqo guri ka baddan kuwii loo diri jiray xilligiisii hore.
7. Iwm

Hadaba noqo arday geesi ah caaqilna ah oo caqligiisa iyo geesinimadiisa kaga gudba arimahas iyo caqabadahas kor aan ku soo xusnay, waxaadna kaashataa daganaan iyo dadaal dheeri ah adiga oo tala saaranaya illaahii ku abuurtay, kaashanayana dadkii kaaga horeeyay waxa aad baranaysid, waa hubaal in aad guulaysan doontide, haddiisa ay ku qaado fuleynimo

iyo walwal oo aad koontorooli wayso naftaadda iyo maskaxdaada, caqligaagana aad kaashan wayso waxaa hubaal ah in aad guuldareysan doontid, alle ma qadaree.

## Isbuuca 1-aad ee Jaamacadda

Waxaa hubaal ah in ay ku soo wajaheyso cabsi yar, xishood, iyo kalinimo aadan dareemi jirin xiligii dugsiga sare, laakiin waxaa xaqiiqo ah in si fudud aad uga bixi kartid haddii aad adeegsatid maskax furan raacdidna talooyinka hoos ku qoran.

1. imow jaamacadda ka hor maalin ama laba maamood haddii ay kuu suurta galayso, hadii kalase imow ka hor saacad ama laba saacadood maalinka 1-aad ee jaamacaddu kuu bilaabanayso, adiga oo qiimeyn iyo indho indheyn ku samaynaya fasalada jaamacadda, si fiicanna u akhrinaya magacyada fasalada iyo sida ay isku raacsan yihiin iyo goobaha ay ku kala yaalaan dhisma ahaan.

   sababtoo ah waxaad wax ku baran doontaa fasaladdaas fasal ka mid ah magaciisana laguu sheegi doonaa, hadaba indho indheyntana waxay kaa caawnaysaa in aad si toos ah u abaartid

fasalka laguu sheegay in aad ku qoran tahay oo uusan waqti kaa gelin raadinta fasalka xilliga cashirka.

2. La imow waji furnaan, maxaa yeelay waxaad u baahan tahay in aad hesho saaxiib ama asxaaab kula qaybsata cidlada aad dareemeysid, safarka dheer ee kuu bilaabmayna aad isku weheshataan, hadiise aad waji xirxiran ku qaabishid asxaabta kugu fasalka ah waxaa laga yaabaa in adiga oo xummeen xummaan laga qaato.
3. Horey usoo qaado buug yar oo aad ku qoratid magacyada maadooyinka manhajkaaga, jadwalka cashiradda, magacyada macalimiinta iyo address-yadooda, iyo waliba hadii ay jiraan macallimiin cashirka hore usii bilaabaya notes-kooda, anaga oo ku baran doona cutub dhan sida loo qaato Notes-ka cashirka.
4. Iibso buugta manhajka cashirada laga dhigo, si aad note-ka macalinka iyo cilmiga ka buuxa aad iskugudarsatid, horumar dhan walbo ahna aad kagaartid maadada aad baratid, hadi aad

sidaa yeeshana waxaa hubaal ah in aad noqon doontid ninka ugu horeeya fasalka dhexdiisa iyo imtixaanaadkaba, nasiib wanaagse waxaad ku baran doontaa cutubyada soo socda mid kamid ah sida ugu fiican ee loo akhriyo buugta cashirada.

5. Udiyaar noqo assignments-ka ay kuu dirayaan macalimiinta, kuna dadaal in aad mid walbo waqtigiisa ku soo gudbiso, haddii aadse yareysato oo ay kugu bataan waxay kugu keenayaan in ay kugu adkaadaan waqtigana uukugu dhaco, halkaasna niyad jab uu kugu dhaco, buundana ay ku dhaafto, nasiib wanaagse waxaad ku baran doontaa cutubyada soo socda mid kamid ah sida loo diyaariyo assignments-ka.
6. Sida aad fasalka ugu yeelatay asxaab, wajiya badan oo cusubna u kulanteen isku day in aad u baratid macalimiinta wax kuu dhigi doona, sidoo kale baro maamulka kuliyadda aad dooratay, maxaa yeelay in badan ayaad u baahan doontaa.

7. Xilliga bareega ama xilliga ay xisasku soo idlaadaan, waxaad kormeer ku soo martaa adiga oo kaashana asxaabta cusub ee aad isku fasalka noqoteen xafiisyada jaamacadda adiga oo ujeedadaadu tahay in aad ogaatid maamulka jaamacadda iyo xafiis walbo meeshuu kaa xigo, sida xafiiska kuliyadda, xafiiska macalimiinta, xafiiska imtixaanada, xafiiska maaliyadda iyo xafiiska arimaha ardayda.
8. Caawi ardayda aan garaneyn inta aad adiga jaamacadda ka baratay sida u tilmaam ama geey xafiisyada ay u baahan yihiin, u sheeg macalimiinta iyo meesha ay kala xiriiri karaan, waa hubaal in ay booskii cabsida isku baali doonto kalsooni iyo qanacsanaan nafsadeed oo aad dareemi doontid.
9. ka qeyb qaado dhismaha maamulka fasalkaaga adiga oo aan xil doon ahayn, maxaa yeelay hadduu hagaago hogaanka fasalka waxaa hagaagaya mustaqbalka horumarka ee fasalkaas, haddise uu hogaanka ka halaabo waxaa xummaanaya xiriir kasto oo uu

fasalka la yeelan lahaa maamulka jamacadda, macalimiinta iyo fasalada kale ee jaamacadda.

10. Soo dhawee talooyinka ay kuu soo jeedinayaan ardaydii kaaga horeysay jaamacadda sida maamulka ardayda oo ah Midowga Ardayda Jaamacadda, iyo cid walboo ardayda ka tirsan ee talo waxbarashadaada anfacaysa kuu sheegaya.
11. Ugu dambeyntii noqo Ruux ku tilmaaman wanaaga, looga daydana Horumarka.

## Sida Loo Qaato Notes-ka Cashirka

Ku dhaqaaq qodobadan soo socda kahor cashirka maalintaas, xilliga cashirka, iyo cashirka kadib intaba, maxaa yeelay waxay kaalin libaaxle ka qaadanayaan fahmidda cashirka, maskaxdana waxay u diyaarinayaan in ay isku xirto cashirkii hore iyo cashirka cusub.

### Ka hor cashirka

1. Dib u akhri note-kii cashirkii shalay, adiga oo u diyaar garoobaya in aad isku xirtid ujeedada iyo nuxurka labada cashir ay xambaarsan yihiin.
2. Akhri cashirka cusub ee maanta ka hor inta uusan macalinku akhrin ama sharixin, adiga oo kaashanaya buuga manhajka ah ee laga dhigo maadada, muhiim mahan in aad fahamto dhammaan cashirka, laakiin waa in aad fahamtaa ujeedada guud ee u cashirku ka hadlayo.

## Xilliga Cashirku Socdo

1. Imow fasalka xilli hore si aad u hesho kuraas hore, maxaa yeelay waxaa kuu fududaanaysa in aad si toos ah ula socotid macalinka, islamarkaana si sahlan u weydiin kartid su'aalo.
2. Ka dheerow wax walbo oo carqalad ama mashquul kugu noqon kara, sida hadalka inta uu socdo cashirka, ku mashquulidda Mobile-kaaga ama buugaagtaada, iyo ku mashquulidda hadalka ama labiska macalinka.
3. Taariikhda maalinkaas ku qor bogga aad note-ka maalintaas ku qoranaysid, maxaa yeelay way fududahay in la raadiyo lana soo helo cashir walbo xilligii la qaatay.
4. Note-ka ku qoro dhinac ka mid ah bogga aad ugu talagashay, dhanka kalana u baneey wixii ka dheeri ah note-ka cashirka, sida tilmaamo dheeri ah oo uu macalinka sheegay, sharaxaad dheeri ah oo aad ka heshid buuga manhajka kadib markii aad akhrisay cashirka kadib.

5. Isticmaal afkaaga hooyo, sida adiga oo u sharaxaya qof kale, maxaa yeelay xusuusta waxaa ku raagi og, hadhowna ay u fududahay in ay soo xasuusato waa afkeeda hooyo, haddiise aad ku qoran kartid afkuu cashirku ku baxayo si kooban oo aad soo xasuusan kartidna waa ka fiican.
6. Si gaar ah u calaamadi meelaha uu u adeegsado macalinka ereyada ay ka mid yihin:
   - "..... Waa muhiim meeshan........"
   - "..... Natiijadu waxay tahay........"
   - "..... Gunaanadkii....................."
   - "..... Si fiican ila soco meeshan..."
   - "...... Nuxurka cashirku waa......"
   - IWM
7. Isticmaal sawiro iyo farshaxan kuu gaar ah, hadii waxa la sharaxayo ay yihiin wax aan hadal lagu soo koobi karin, adiga oo

adeegsanaya ereyo la soo gaagaabiyey oo adan hadhow hilmaami doonin waxa ay u taagnaayeen.

8. Fiira gaar ah u yeelo su'aalaha ardayda kale, kuwaaga iyo kuwa macalinku idin weydiiyo xilliga cashirka, maxaa yeelay xilliyadaas waxaa la helaa sharaxaad dheeri ah oo dhinacyo kala duduwan kaga imanaysa, hoostana ka calaamadi su'aalaha ugu baddan ee ku soo laalaabta afka macalinka.

**Cashirka Kadib**

Cilmi baaris la sameeyay aya waxay sheegaysaa in 80% ay dhumayaan note-ka la qaato, haddii aanan 24-saac gudohooda dib loogu laaban oo isha la marin ama la akhrinba.

1. Dib u akhri note-kii aad maanta soo qoratay, oo isku day in aad si dhab ah u fahamtid, si ay u dagaan qeybta maskaxda xusuusta dheer qabilsan.
2. Dib u qor oo dib u habeyn ku sameey note-kii, adiga oo isku raacinaya sida ay isku leeyihiin, wixii dheeri ahna ama soo noqnoqdayna ka saaraya.

Intaas ardaygii maraa asaga oo kashanaya sabar iyo go'aan ah in uu si dhab ah wax u barto illaahna tala saartaa, waxaa hubaal ah in uu guuleysanayo inshallah.

## Sida ugu Fiican ee Loo Akhriyo buugta Cashirada

Qaabka wax akhrinta oo leh noocyo fara badan oo ay aqoonyahanadu sifeeyen, ayaan waxaan ka soo qadanaynaa midka ugu macquulsan oo aan kusoo koobi doono qodobadan:

1. Si joogto ah u akhri cashir walbo kahor macalinka ama xilliga cashirka la qaadanayo, akhrintan waxay kaa cawinaysaa in aad fahamtid ujeedada iyo qaab dhismeedka cashirka, iyo waliba in aad si fudud note-ka uga qaadatid cashirka xilliga macalinku sharaxayo.
2. Uqeybi cashirka dhowr qeybood haddii uu badan yahay, qeybintan waxay kugu saacideysaa in aadan ka niyad jabin akhrinta cashirka.
3. Jadwal gaar ah u sameey xilliga wax akhrinta, goobta wax akhrintana ka dhig goob aysan wax kale ku mashquulineynin iftiin fiicana leh.

4. Xilliga wax akhrinta u sameey xilli nasiino ah, oo aad jimicsi iyo luga baxsi soo samaysid, maskaxdana ayada oo fareesh ah ay wax akhrinta usoo laabato.
5. Si dul mar ah u akhri horudhaca cashirka, cinwaanada, sawira haddii uu leeyahay iyo gunaanadka cashirka.
6. Ubadal su'aalo cinwaanada cashirku ka kooban yahay, sida "faa'iidada waxbrashada." u badal "waa maxay faa'iidada waxbrashada?"
7. Bilow akhrinta cashirka oo dhameystiran, adiga oo hoosta ka xariiqaya hadal walbo oo nuxur leh, ama jawaab u noqon kara su'aalihii aad ka diyaarisay cinwaanada buuga.
8. Dib u milicso cashirkii aad soo akhrisay soona calaamadisay, si uu u dago maskaxda oo aadan u hilmaamin.
9. Si uu cashirku xusuusta u dago kor u akhri si hadii ay dad kula joogaan ay maqli karaan adiga oo isku sharaxaya, ama qor wixii aad ka fahamtay cashirka.

## Sida Loo Diyaariyo Assignments-ka

Diyaar garowgu waa furaha guusha, siiba xilliga diiyaarinta assignments-ka, waxaana sida ugu haboon ee la raaco marka la qorayo assignments-ka noqonaysaa:-

1. Si kooban u qor qodobadda ugu muhimsan ee uu ka hadlayo assignment-ga, maxaa yeelay waxa uu kaa caawinayaa in aadan ka tagin muhiimaddii aad ka hadlaysay ee uu ku saabsanaa assignment-gaadu. Sidoo kale waxa uu kaa caawinayaa in ay raadinta qodobadaas kuu fududaato.
2. Horudhac kooban oo qurux badan u sameey qoraalkaaga, adiga oo si kooban u sharaxaya qodobada ugu muhimsan qoraalkaaga iyo ujeedada qoraalkaaga, maxaa yeelay horudhaca assignment-gu waa meesha laga eegayo nuxurka iyo quruxda assignment-ga.
3. Xaqiiji in bartama assignment-ga fikradaha ku qoran ay yihiin kuwa is raacsan oo is dhameystiraya, si akhristuhu ay ugu fududaato in uu fahmo.

4. Usameey tixraac qoraalkaaga adiga oo sheegaya cidda aad ka soo xigatay hadalkaaga, buug ama website iyo cidda qortay intaba.
5. Isticmaal tusaalooyin kala duduwan oo sharaxaya nuxurka assinment-gaaga.
6. Gunaanad soo koobaya nuxurka assignment-gana ku soo gabagabeey.

## Sida loo Diyaariyo Presentation-ka loona soo Jeediyo

Si uu unoqdo presentation-ka mid si fiican loo dhageysto oo qurux ku dhamaado, dadkuna ka faa'iidaan adigana aadan ku daalin, raac qodobadan:

1. Ogow ujeedada presentation-kaaga iyo dadka ku dhagaysan doona waxa ay yihiin, kadibna qor presentation-ka adiga oo u sameynaya horudhac, duluc iyo gunaanad.
2. Horudhaca si kooban uga hadal ujeedada presentation-ka, adiga oo qoraalkaga ka dhigaya qodobo kookooban.
3. Dulucda Presentation-kana uga hadal nuxurka presentation-ka, adiga oo aan sidoo kale qoraal badan qoreyn, ee sawiro iyo shax si fiican loo soo qurxiyay ka dhigaya.
4. Gunaanadkana si kooban uga hadal wixii aad dulucda kusoo sharaxday, adiga oo raacinaya tixraac wixii kuu diyaarsan.

5. Maalinta aad soo jeedinaysid presentation-kana si qurux badan usoo labiso, oo dhoola cadeyn iyo farxad lasoo hor istaag fasalka.
6. Haddii aad dareento in uu fasalku kugu caajisay ama hadalkaaga la fahmi la'yahay, weydii su'aal fudud oo ku saabsan wixii ugu dambeeyay ee aad sharaxday, si caajiska uu meesha uga baxo, waxa aad ka hadlaysidna loogu soo baraarugo.
7. Gabagabadiina u ogoloow fasalka ciddii su'aal qabta in ay ku weydiiso, si daganna ugu jawaab, hadii ay tahay su'aashu mid quseysa mowduucii aad ka hadashay, hadiise ay ka baxsan tahay mowduuca si dagan ugu qanci saaxiibkaa in aysan mowduuca ku jirin arintaas.

## Guusha Maalinta Imtixaanka

Waqti dheer oo waxbarasho ah kadib waxaa la yimid xilligii lakala saari lahaa ciddii wixii la soo baray fahantay iyo cidii kale, waa xilligii la galayay imtixaanka jaamacadda, guusha imtixaankana waxaa ka sokeeya arimo fara badan oo u baahan in sida ugu haboon loo wajaho, qodobadan soo socda ayaana si fiican u sharixi doona.

1. Diyaar garoobidda maalinkaan oo ka soo bilowday maalinkii ugu horeyay ayaa waxa uu kaa dhigayaa arday si fiican u diyaarsan, oo ka badbaada culeysyo fara badan oo soo wajahaya ardayga kale ee diyargarowga bilaaba xilli ay maalin ama maalmo ka dhiman yihiin imtixaanada.
2. Soo toos xilli hore, oo qaado cunto fudud, iskuna diyaari imtixaanka.
3. Iska hubi xilliga imtixaanka iyo goobta lagu galayo maalin ka hor.

4. Inta aadan ka soo bixin guriga iska hubi in ay ku dhanyihiin qalabkagii sida qalimaanta, ID-ga, kaarka imtixaanka iyo wixii kale oo ay jaamacaduu kaaga baahan tahay xilliga imtixaanka.
5. Xilli hore soo aad jaamacadda maalinka imtixaanka, maxaa yeelay wax dhici doona ma ogid, ee si aadan uga daahin ama baaqan imtixaanka waqti hore imow jaamacadda.
6. Haddii ay kuu yimaadaan ama kaa soo ag dhawaadaan arday kale oo buuqeysa ama ka hadlaya wax aan imtixaanka ahayn, ka dheeroow waxba kuuma soo kordhinayaane in ay wax kaa dhimmaan maahee.
7. Gal suuliga ka hor inta aan imtixaanka loo fadhiisan, oo soo gudo xaajadaada, maxaa yeelay imtixaanada haddii ay bilaabmaan lama ogola in ay cid baxdo ama dhaqdhaqaaq samayso.
8. Ha iloowin in aad ku qortid magacaaga iyo ID-gaaga waraaqaha imtixaanka.

9. U akhri dhamaan su'aalaha imtixaanka si dul mar ah, kadibna u qorsheey su'aalaha sida aad u kala hormarin lahayd.
10. Ka shaqeey su'aasha aad ugu qanacsan tahay in ay kuu fududahay ka jawaabideeda, in aad jawaabaha kala hormarisidna wax dhibaata ah ma lahan, haddii aad su'aal walbo nambarkeeda iyo jawaabta nambarkeeda uu is waafaqsan yahay.
11. Su'aalaha kugu adkaada jawaabtooda waxaad ka dhigataa xilliga ugu dambeeya oo intii aad taqaanay ka soo jawaabtay.
12. Haka cabsan in aad su'aal weydiiso macalinka kaa qaadaya, haddii ay su'aalaha qaar kuu cadaan waayayaan ama aad fahmi weysid.
13. Iska ilaali dagdagta oo dhamaystiro waqtigaaga imtixaanka, haddiise aad dhamaysatid shaqadaada, dib u akhri oo ku laalaabo jawaabihii aad qortay laga yaabee in aad qalad ku aragtide ama wax kaa maqan soo xasuusatide.
14. Hambalyo, waad guuleysatay haddii intaas aad hirgalisid.

## Imtixaanka kadib

Kadib markii laga soo baxo imtixaanka waxa ay ardaydu isku weydaarsadaan fikiradooda banaanka fasalada, ayaga oo is weydiiya jawaabaha su'aalihii imtixaanka sida looga soo shaqeeyay, ardayna doodaas waxay ka sii qaadaan farxad oo waxaa u saxma wixii ay soo qoreen, kuwa kalana waxay ka qaadaan niyad jab iyo murugo, maxaa yeelay sida wax loo shaagayo maysan usoo dhigin jawaabaha qaar.

Hadaba si aad uga badbaado niyad jabkaas, ama aadan u niyad jabin saaxiibkaa, ha bilaabin hana ka mid noqon dooda noocaas oo kala ah.

Imtixaanada kadib waxaa la galaa fasax, si arday, macalin iyo maamulba loo soo nasto, imtixaanadana loo soo saxo, hadaba hurdo fiican soo seexo, damaashaad iyo dalxiisna aad haddii aad awoodid, maskax iyo jir intaba si ay uga nastaan daalkii safarkii dheeraa ee lasoo waday muddada.

## Dhaqanka Maalinta Natiijada

Sida caadada ah maalmaha natiijada dadna aad bay u farxaan kuwana aad bay u niyad jabaan, hadba natiijada ay helaan ayayna ku xiran tahay, hadaba si aad unqotid arday maalintaas ka gudba oo guul iyo qanaacsanaan natiijadiisa ku guddooma, waxaan kugula talinayaa:

1. Habeenka maalinta natiijada si fiican useexo, walwalkana iska yareey.
2. Subixiina quraac fiican soo cun, waqti fiicanna soo bax, si aad natiijadaada u heshid inta uu jawigu dagan yahay.
3. Hadii aad heli kartid qof walaal ama saaxiib ah oo waqtigaaga kula qaata maalinkaasna inta natiijada aad usoo socotid, markii aad qaadanaysid natiijada iyo markii aad xaafadda u laabatid intaba, maxaa yeelay waxa uu qofkaas kuu suurta galinayaa in aysan maskaxdu isla hadlin kaligeed, farxad ama murug midba.

4. Waxba ha la barbar dhigin natiijada imtixaankaaga kuwa asxaabtaada, maxaa yeelay natiijada imtixaanka adiga ayay gaar kuu tahay, ee waxaad iskubarbar dhigtaa rajadaadii iyo natiijada aad heshay farqiga u dhaxeeya.
5. Hadii aad hesho natiija aad ku faraxdo, farxaddas la qaybso asxaabta kula midka ah, amaba saaxiibka kula socda, ee ha ugu faanin kuwa kaa hooseeya eeka murugaysan natiijada ay helleen.
6. Hadiise aad hesho natiija ka hooseysa halkii aad fileysay, laba arinba way kuu furan tahay, in aad ku qanacdo una sii diyaar garowdid imtixaanada kale ee soo socda, ama aad la xiriirtid xafiiska imtixaanada.
7. Mar walbana u hogaansan oo ka dambey sharciga udagsan jaamacadda aad dhigatid, xilli imtixaan iyo xilli kale intaba.

## Gunaanad

Mahad idilkeed allah ayay u sugnaatay ee isuurta geliyay wixii karaankayga ahaa in aan qoro bulshadana uga faa'iideeyo, aniga oo kaashanaya khibradeyda ardaynimo iyo buugaagta cilmiga waxa ay ka qoreen arimahan la xiriira ardayga iyo sanadka 1-aad ee jaamacadda.

Waxaan ka cudur daaranayaa mar labaad iyo mar sadexaadba haddii aad ku aragtaan qalaldaad daabacaada xageeda ah ama nuxurka iyo afka soomaaliga oo qabyo idinla noqdo, maxaa yeelay buugaan oo ah buug noociisa ah kii ugu horeeyay, iyo aniga oo fanka wax qoriddaku cusub ayaa sabab u ah arimahaase.

hadii uu jiro walaal wax ku daraya ama wax ka saxaya buugga amaba talo igu soo biirinaya waxa uu igala soo xiriiri karaa address-kayga.

**Mohamed Ali Yalahow**

**Tell: +252-612-868080**

**Email: mcyalah@gmail.com**

**MAHADSANID**